SIOUX CITY
PreschoolInitiative
PROGRAM

Sioux City
Community
Schools
believe... achieve... succeed

MANHAJ

Qaab-dhismeedka manhajka wuxuu ku saleysan yahay Creative Curriculum (Manhajka Waxbarashada Hal-abuurka leh), Qiimaynta GOLD, Guddiga Waxbarshada ee Waxbarashada Hore ee Gobolka Iowa, iyo Qorshaha Waxbarashada Shaqsiyeed - IEP ee arday walba (hadii ay habboon tahay). Qorshayaasha waxaa loo hagaajiyay in lagu baahi tiro baahiyaha waxbarasho ee ardey kasta.

Falsafada Creative Curriculum (Manhajka Waxbarashada Hal-abuurka leh)

Xudunta hannaanka Xeeladaha Waxbarista ee waxbarashada carruurnimada hore waa *The Creative Curriculum*®, manhajka ugu horeeya wadanka ee sayniska ku saleysan, ee dhameystiran ee loogu talagalay barnaamijyada loogu adeego carruurta laga soo bilaabo dhalashadooda ilaa iyo 5 jir.

Waxaan rumeeysan nahay in manhajka lagu dhex daro qiimeyn tayo sare leh, horumarin xirfadeed, iyo khayraadka isku-xirka qoyska si loo abuuro barnaamij si dhmeystiran loo diyaariyay oo wax ka qabta baahiyaha xirfadlayaasha waxbarashada caruurnimada hore, carruurta, iyo qoysaskooda.

The Creative Curriculum®, wuxuu kaa caawinayaa inaad qorsheyso oo aad dhaqangeliso barnaamij u habboon korriin ahaan oo sare u qaada kobaca awooda carruurta ku fahmaan dareenka dadka kale kuna xakameeyaan dareenkooda iyo waxbarashada ee goobaha muhiimka ah ee wax qorista iyo akhrinta, xisaabta, sayniska, iyo cilmiga bulshada.

Waxay iskuugu geeysaa daraasadihii ugu dambeeyay iyo fikradaha ugu hor leh hannaan horumar u leh waxbarashada-- mid qadariya hal-abuurka isla markaana xushmeeya doorka macallimiinta ka qaataan ka dhigista barashada mid xiisa leh oo ku habboon ilmo kasta iyo fasalkiisa.

Hannaankeena gaarka ah ayaa loogu talagalay in lagu dhiirrigeliyo macallimiinta, si looga caawiyo inay abuuraan jawi waxbarasho oo tayo sare leh, mida ugu muhiimsan, si loo taageero dadaaladooda muhiimka ah markay albaabada u furayaan waxbarasho guul leh.

Iyada oo la adeegsanayo *The Creative Curriculum*®, barnaamij kasta wuxuu abaabuli karaa nidaam dhameystiran oo kor u qaadaya natiijooyinka togan ee carruurta oo dhan, oo ay ku jiraan ardeyda luqadda Ingiriisiga, carruurta naafada ah, iyo ardeyda fahamka sare leh. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Creative Curriculum (Manhajka Waxbarashada Hal-abuurka leh) ayaa laga heli karaa www.teachingstrategies.com .

Ujeeddooyinka Manhajka waxaa ka mid ah:

<u>Awooda Carruurta Ku Fahmaan Dareenka Dadka Kale Kuna Xakameeyaan Dareenkooda</u>

1. Wuxuu dhowraa shucuurta iyo dhaqamada shaqsiga
    a. Wuxuu maareeyaa dareemada
    b. Wuxuu raacaa xaddidaadaha iyo filashooyinka

c. Wuxuu u xannaaneeyaa baahiyaha shaqsiyadeed si habboon

2. Wuxuu dhisaa oo joogteyaa xiriirada wanaagsan
    a. Wuxuu xiriir la sameyaa dadka wawayn
    b. Wuxuu ka jawaabaa baaqyada shucuurta
    c. Wuxuu la falgalaa asxaabta
    d. Wuxuu sameystaa saaxiibo

3. Wuxuu si iskaashi iyo waxtar leh kaga qaybqaataa xaaladaha kooxda
    a. Wuxuu isku dheellitiraa baahiyaha iyo xuquuqaha naftaada iyo kuwa kale
    b. Wuxuu xaliyaa dhibaatooyinka bulshada

Jir ahaan

1. Wuxuu muujiyaa xirfadaha safarka

2. Wuxuu muujiyaa xirfadaha isku dheelitirada

3. Wuxuu mujiyaa xirfadaha waxyaabaha gacmaha iyo lugaha lagu ciyaaro

4. Wuxuu muujiyaa awooda iyo iskuduwida murqaha yar yar ee gacmaha
    a. Wuxuu isticmaalaa faraha iyo gacmaha
    b. Wuxuu isticmaalaa qalabyada wax qorida iyo sawirida

Luuqad

1. Wuxuu dhageystaa oo uu fahamaa luuqada sii adkaaneysa
    a. Wuxuu fahamaa luuqada
    b. Wuxuu raacaa tilmaamaha

2. Wuxuu adeegsadaa luuqad si uu u muujiyo fikradaha iyo baahiyaha
    a. Wuxuu isticmaalaa erayda cusub ee wax tilmaama
    b. Wuxuu u hadlaa si cad
    c. Wuxuu isticmaalaa naxwaha caadiga ah
    d. Wuxuu wax ka sheegaa waqti ama goob kale

3. Wuxuu isticmaalaa xirfdaha wadasheejeysiga iyo wadaxiriirka kale ee habboon
    a. Wuxuu ku lug yeeshaa wadasheekeysiyada
    b. Wuxuu isticmaalaa sharciyada bulshada ee luuqada

Garashada

1. Wuxuu muujiyaa hannaanada habboon ee waxbarashada
    a. Wuu xaadiraa wuuna ku lug yeeshaa
    b. Wuu nagaadaa
    c. Wuxuu xaliyaa dhibaatooyin
    d. Wuxuu muujiyaa xiiso iyo dhiirrigelin
    e. Wuxuu muujiyaa dabacsanaanta iyo hal-abuurnimada fikirka

2. Wuxuu xasuustaa oo isku xiraa waayo-aragnimada
    a. Wuu aqoonsadaa dibna wuu u xusuusataa
    b. Wuxuu sameeyaa isku xir

3. Wuxuu adeegsadaa xirfadaha kala-saaridda

4. Wuxuu adeegsadaa calaamadaha iyo sawirrada si uu u matalo wax aan yaalin
    a. Wuxuu u fikiraa si mataalaad leh

b. Wuxuu ku lug yeeshaa ciyaaraha jilista ruwaayada

Wax Qorista iyo Akhrinta

1. Wuxuu muujiyaa xirfada aqoonsashada qaybaha luuqada
    a. Wuxuu ogaadaa oo uu soocaa laxanka
    b. Wuxuu ogaadaa oo uu soocaa erayada isku xarafka ka bilaabma
    c. Wuxuu ogaadaa oo uu soocaa dhawaaqa yare ee sii yar
2. Wuxuu muujiyaa aqoonta alifbeetada
    a. Wuxuu soo qabtaa oo uu magacaabaa xarfaha
    b. Wuxuu adeegsadaa cilmiga dhawaaqa xarafka
3. Wuxuu muujiyaa aqoonta farta wawayn iyo isticmaalkeeda
    a. Wuxuu adeegsadaa oo u qiimeeya buugaagta
    b. Wuxuu adeegsadaa fikradaha farta wawayn
4. Wuxuu fahmaaa oo uu jawaab-celin ka bixiyaa buugaagta iyo qoraalada kale
    a. Wuxuu dhexgalaa inta lagu gudajiro akhriska kor loogu qaadayo carruurta iyo wada hadallada buugga
    b. Wuxuu adeegsadaa xirfadaha wax akhrinta markaas socda
    c. Wuxuu dib u sheegaa sheekooyinka
5. Wuxuu muujiyaa xirfadaha wax qorista markaas socda
    a. Wuxuu qoraa magaca
    b. Wuxuu wax u qoraa si uu u gudbiyo macno

Xisaabta

1. Wuxuu adeegsadaa fikradaha tirada iyo xisaabinta su’aalaha
    a. Wuu tiriyaa
    b. Tiruu u yeelaa
    c. Wuxuu ku xiraa lambarada tiradooda
2. Wuxuu sahmiyaa oo uu faahfaahiyaa xiriirada meelaha ay ku kala yaalaan waxyaabaha iyo qaababka
    a. Wuxuu fahmaa xiriirada meelaha ay ku kala yaalaan waxyaabaha
    b. Wuxuu fahmaa qaababka
3. Wuu isbarbardhigaa wuuna cabbiraa
4. Wuxuu muujiyaa aqoonta naqshadaha

Sayniska iyo Teknolojiyada

1. Wuxuu adeegsadaa xirfadaha baarista sayniska
2. Wuxuu muujiyaa aqoonta astaamaha waxyaabaha nool
3. Wuxuu muujiyaa aqoonta sifooyinka jir ahaaneed ee shey'yaasha iyo alaabada
4. Wuxuu muujiyaa aqoonta bey'ada Dunida
5. Wuxuu adeegsadaa qalabyo iyo teknolojiyo kale si uu u guto howlaha

Cilmiga Bulshada

1. Wuxuu muujiyaa aqoonta ku saabsan naftaada
2. Wuxuu muujiyaa fahamka aasaasiga ah ee dadka iyo sida ay u nool yihiin

3. Wuxuu sahmiyaa isbedelka la xiriira dadka ama meelaha la yaqaan

4. Wuxuu muujiyaa aqoon juqraafiyeed fudud

Farshaxanka

1. Wuxuu sahmiyaa farshaxanka muuqaalka ah

2. Wuxuu sahmiyaa fikradaha muusikada iyo muujinta

3. Wuxuu sahmiyaa fikradaha qoob ka ciyaarka iyo dhaqdhaqaaqa

4. Wuxuu sahmiyaa riwaayadaha iyada oo loo maro ficillo iyo luqad

Qaadashada Luuqada Ingiriiska

1. Wuxuu muujiyaa horumarka ku saabsan dhageysiga iyo fahamka Ingiriisiga
2. Wuxuu muujiyaa horumarka ku hadlida Ingiriisiga

Qiimeynta Creative Curriculum (Manhajka Waxbarashada Hal-abuurka leh): GOLD

Ujeedada qiimeynta

Macluumaadka qiimeynta wuxuu muhiim u yahay shaqsi ku saleynta waxbarida carruurta yar yar. Nidaamkan cusub wuxuu taageeraa macallimiinta wuxuuna kor u qaadaa hababka waxbaridda habboon ee ka caawiya carruurta dhamaan dhista aasaaska ay u baahan yihiin si ay guul uga gaaraan dugsiga.

Xirfadaha gaarka ah ee lagu cabbiro GOLD

Cabbirkan wuxuu diiradda saaraa tobanka ujeedo ee GOLD ee loogu talagalay horumarka iyo barashada (kor lagu soo sheegay).

Sidee loo adeegsadaa aaladda qiimaynta?

Shaqaalaha fasalka ayaa dusha ka eega cunug kaste in muddo ah, balse macnaha guud ee dusha ka eegida ayaa noqon kara goob kooxeed.

Sidee loo adeegsadaa oo loola wadaagaa macluumaadka qiimeynta qoysaska?

Shaqaalaha fasalka ayaa hayn doona diiwaannada cunug kasta waxayna buuxin doonaan qiimaynta heerarka xirfadaha. Macallinka ayaa tarjuma natiijooyinka oo u adeegsada qorsheynta hawlaha maalin kasta iyo go'aaminta baahiyaha cunug kasta. Laba jeer sanadkii qoysaska waxay kulan la yeelan doonaan macallinka fasalka halkaas oo warbixinta qoyska lagula wadaagi doono. Warbixintan waxay faahfaahineysaa horumarka cunuggaaga uu ka sameeyay qaybaha kor lagu soo sheegay.

Ku lug lahaanshaha qoyska

Inta lagu gudajiro shirarka, booqashooyinka guriga, iyo isgaarsiinta maalinlaha ah, shaqaalaha fasalka waxay macluumaad ka raadin doonaan qoysaska oo ku saabsan xirfadaha iyo dhaqamada ilmahooda ay ku muujiyaan guriga. Macluumaadka laga soo uruuriyay qoysaska waxaa loo isticmaalaa hannaanka qiimeynta.

Qiimaynta Kale

Baaritaanka IGDI waxaa laga qaadi doonaa dhammaan ardayda saddex jeer sanad dugsiyeedka oo dhan. Baaritaanka wuxuu sheegaa haddii ardayda ay u ku yeelanayaan xirfadaha wax qorista heer ku habboon.